



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka**

**Hadal-qoraalka kalfadhiga 3-aad
Ducomentiga Kal .3-aad Kul. 11--aad/2013**

07/10/2013

Kalfadiga 3-aad

Kulankiisa 11-aad, Sac.fur. 11:15gh-Sac.Xir.12:35gd.

Guntinta: 157

Ajendaha:

- 1. Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariinka**
- 2. Ansixinta Ajendaha**
- 3. Qeybinta Heshiiskii Turkiga
(Favouri) Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta iyo Boostada iyo Isgaarsiinta**
- 4. Akhrinta 1-aad ee Hindise Sharciyeedka Bankiga Dib-u-Dhiska Hor'umarinta Soomaaliyeed.**

Shir-Guddoonka ,Guddoomiye K/Xigeenka 1- Mudane Jeylaani Nuur Ilkar.

Waxaa shirka furay Guddoomiye K/Xigeenka 1-aad Mudane Jeylaani Nuur Ilkar ,waxaana lagu furay Aayadaha Qur'aanka Kariimka ,uu akhriyey Xil. Sheekh Shaacir.

Kadib, Guddoomiyaha waxa uu xildhibaanada weydistey in ay ansixiyaan Ajandaha weyna ansixiyen.

XIL:SAMAAN: wuxuun soo jeedinayaa in manta loo keeney ,hindise sharciyedka Bankiga dib-u-dhiska Hor'umarinta Soomaaliyeed , halkana uu doonayo in uu akhriyo Guddoomiyaha Bankiga, wuxuusheegay intaas ay san sax ahayn, in uu Golaha ka hor akhriyo. waa inuu yimaadaa, wasiirka wasaarada maaliyada, waayo Bankiga waxa uu hoos yimaadaa, Wasaarada Maaliyada.

XIL: CABDALA BOSS: wuxuu halkas ka soo jeediyey, Heshii kii loo keeney oo ah Turkiga (favouri) iyo Wasiirka Warfaafinta, in lagu soo lifaaqo, saxiixa labada Documenti.

Guddoomiyaha wuxuu sheegay inla keeno Wasiirka wasaaraadda maaliyadda si uu u akhriyo hindise sharciyeedka bankiga dib-u-dhiska horumarinta.

Waxaa kale uu guddoomiyaha sheegey ,in lagu soo lifaaqidoono hishiiskii ay wadasaxiixeyn Turkiga(favouri) iyo Wasiirka Wasaarada Warfaafinta.

Guddoomiyaha ayaa xildhibaanada usheegay in soo akhristaan mudo 24 saac ah .

Shir-Guddoonka, Guddoomiye k/x/1-aad Mudane,Jeylani Nuur Iikar, uu shirgu ddoominayay kal.3-aad kul. 11-aad uu sheegey in shirka xiranyahay saacada markey aheyd 12:35gdm